

# Soo sheeg dhibidda

**Haddii ilmo uusan xannaanada carruurta ama dugsiga wanaag ka dareemin macnaheedu ma aha inay dhibid keliya tahay. Si kasta ha ahaatee waa inaad soo gudbisid welwalkaaga.**

Dhamaman kuwa ka shaqeeya xannaanada carruurta, dugsiyada iyo meelaha xilliyada firaaqada waxaa waajib ku ah iney la socdaan, wax ka qabtaan oo ay soo gudbiyaan haddii ay ka shakiyaan ama ogaadaan inuu ilmo uusan wanaag iyo nabad qabin.

Waalidiinta iyo shaqaalaha oo wada jira waa iney ogaadaan welwalku waxuu ka kooban yahay, waana iney shaqaaluhu dhagaystaan welwalka , baadhaan oo qiimeeyaan in wax laga qabto.

Goorma ayaad soo sheegaysaa?

Waalidiin badan ayaan hubin marka ay haboon tahay in la soo sheego. Ma aha iney noqoto dhibid toos ah, mana aha sidoo kale inaad haysid «cadeyn». Waxaa kaliya oo ku filan in uusan cunugaagu wanaag dareemeyn. Waa cunugga dareenkiisa waxa la qiimeynayo.

Sidee baad u soo sheegaysaa

Waxaad ku soo sheegi kartaa hadal adiga oo u sheegaya shaqaalaha am hogaamiyaha xannaanada carruurta – ama macalimiinta, shaqaalaha SFO iyo maamulaha dugsiga. Waxaa kale oo aad kusoo gudbin kartaa qoraal aad u soo diraysid xannaanada carruurta ama dugsiga. Si kasta oo aad dooratid inaad sameysid xannaanada carruurta iyo dugsiga waajib ayaa ka saaran iney baadhitaan siyaado ah sameeyaan.

Foomka la soo dirayo [Henvendelseskjema om utrygt skolemiljø](#). (Waxaan u malayn in foomkan uu yahay mid afaf badan ah iyo)

Abuur kiis haddii shaki jiro

Sida ugu dhakhso badan ee xannaanada carruurta iyo dugsiga uga shakiyaan in cunug dhibaato haysato – ha noqoto in cunuga naftiisa, waalidka ama shaqaalaha soo sheegay waa inay abuuraa kiis. Ilmaha, waalidiinta iyo kuwa kaleba ee ku lug leh xaq ayey uleeyihiin in la dhagaysto.

## Bilaabidda baadhitaanka

Waxa ugu horeeya ee dhici waxaa weeye in xannaanada carruurta ama dugsiga uu kormeer aragti ah ku sameeyo xaaladda. Maamulaha ama hogaanka waxay u soo dirayaan degmada Bergen haddii:

- Cunuga loo gaystey dhib/gacan qaad
- Haddii shaqaalaha dugsiga ama xannaanada carruurta ku lug lahaayeen
- Carruur dhawr ahi dhibaan cunug
- Haddii dhibiddu ay ka dhacdo aalada dhijitaalka iyo dugsiga kala duwan

Haddii kiisku ku khuseeyo dugsiga ama xannaano carruurta oo gaar loo leeyahay waa in mulkiilaha loo sheegaa.

## Dooro waxqabad

Markii xannaanada carruurta ama dugsiga ay ka helaan aragti buuxda xaaladda, waa iney sameeyaan qorshe la socdo waxqabad taas oo la sameynayo. Qorshuhu waa inuu noqdo mid qoraal ah si adiga iyo cunugaagu aad u ogaataan maxaa la sameeyay..

Qorshaha waa inay ku jiraan:

- Dhibaatadee baa la xalinayaa
- Waxqabadkee baa la qorsheeyay
- Goorma ayaa waxqabadyada la fulinyaa
- Yaa masuul ka ah fulinta
- Goorma ayaa waxqabayada la qiimeynayaa

Hogaanka ama maamulaha waa inuu cadeeyaa waxa la qabtay. Kiiska waa inaan la soo gabagabeyn illaa inta uu cunugu ka dareemayo in degaanka xannaanada carruurta ama dugsiga mid nabad ah oo wanaagsan yahay.

## Go'aan sharciyeed

Sharciga xannaanada carruurta iyo xsharciga waxbarashada waxaa ku qeexan in xannaanooyinka carruurta iyo dugsiga ay waajib ku tahay inay udubada u dhidbaan degaan koriin nabad galiyo ah oo loo dhan yahay.

Dugsiga, waxaa khuseeya waajibka waxqabadka ee sharciga waxbarashada cutubkiisa 9A oo ku saabsan degaan waxbarasho oo wanaagsan oo amni ah. Sharci u dhigma ayaa loo go'aamiyey xannaanooyinka carruurtana, sharci ahaanna waxuu noqonayaa ansax laga bilaabo janaayo 2021.